



**Liiska Warbixinta Rakibidda 2aad: Kursiga Gaariga Badalmaya ee Ilamaha ee Gadaal U Jeeda**

**Muhiim:** Kan waa liis warbixineedka guud ee loo samayay in lala kaashado diiwaanka gaariga iyo diiwaanka warbixinta kursiga gaariga ee cunugaaga. Si aad u dadajisid waxtarka liiska warbixinta kaasho oo hadba isha mari diwaanadaas.

"Baddalmaya" waxaa laga wada kursiga gaariga ee horay iyo gadaalba loo isticmaali karo. Waxaa jira saddex nooc ee kuraasida badalmaya: shanta biin ee xakameeya ayaa ah nooca ugu ammaanka badan.

**____1) Xaqiijiso in kursiga gaariga uu yahay mid sax u ah joogga iyo culayska cunuggaaga.**



- Culayska: illaa 30–40 rodol (warshadaha soo saara ayay ku xirantahay, eeg calaamadda kursiga gaariga ku taalla si aad u ogaatid xaddidaadda culayska iyo joogga, labaduba).
- Kursiga gaariga ee 5ta biin leh ayaa la doorbidaa.

**____2) Kursiga gaariga waxaa dhigta kursiga dambe ee gaariga.**
- Hadii gaariga uu yahay "SUV" ama "van" oo leh saddex saf, kursiga gaariga ku rakib safka dhexe.
- Kursiga gaariga ku rakib meesha dhexe ee kursiga gaariga, haddii ay taasi suurtagal tahay (faahfaahin dheeraad ah ka eeg diiwaanka gaariga) Xasuuso: waxa ay u badantahai in aanay kuu suurtoobin in si adag kursiga dhexe ugu xirto. Haddii arrintu ay sidaas tahay isku day in aad ku xirtid kursiga dambe midig ama bidix ee daaqadda u dhaw.
- Kursiga gaariga u jeedi dhinaca dambe ee gaariga.

**____3) Waxaad doorataa hal nooc ee kursiga gaariga lagu rakibayo.**
- Suunka dhabta kaliya (badanaaba ku taala halka dhexe ee kursiga dambe)
- Suunka dhabta iyo garabka.
- Nooca LATCH ("Dhaabashada iyo Silsiladaynta Hoose ee Caruurta", oo uu horayba gaariga u lahaa - **hoos eeg**)

**Xasuusnow:** Xakameeyayaasha kore looma baahna in la isticmaalo kursiga caruurta ee gadaal u jeeda. Haddii aad isticmaalaysid kursiga badalmaya ee gadaal loo jeedinayo, eeg diiwaanka kursiga gaariga si aad u xaqiijisid inaad xakameyayaasha aad si ammaan u isticmaali kartid.

**____4) Ku rakib kursiga gaariga.**



**Muhiim:** Iska eeg calaamadaha kursiga gaariga ku qoran iyo diiwaanka tilmaamaha kursiga gaariga si aad uga heshid akhbaarta ah sidii kursiga gaariga loogu rakiba lahaa ayadoo la isticmaalayo lab mid, suuunka dhabta, suunka dhabta iyo garabka, ama nooca LATCH. Waxaa kaloo tilmaamoyin ka eegtaa diiwaanka gaariga, oo ay kamid tahay haddii aad loogu baahanyahay in la isticmaalo biinka wax isku xira.

- Kursiga gaariga ka dhig mid xooga dhinac janjeera marka ilamaha ay saaranyihiin. (xagal 30-45 digirii marka loo eego xagalka toosan – sawirka eeg).

**____5) Suunka gaariga ku adkee ama silsiladaha lagu xirayo hoos u dhig (LATCH).**
- Kursiga gaariga waa inuusan gees ka gees ama horay iyo gadaal ka dhaqaaqin wax ka badan hal inji halka uu ku rakibnaa. Qofkale si fiican hoos ha ugu riixo kursiga gaariga cunuga inta aad adiga suunka aad kula xiraysid, ama adiga ku kadaloobso kursiga gaariga inta aad suunka gaariga si fiican ugu xiraysid.

**____6) Ilamaha kursiga gaariga suunka kula xir (sawirka eeg).**
- Isticmaal xakemeyayaasha saxda ah. Suunka xakameynta waa inuu la simanyahay garabka ama uu ka hooseyo marka kursiga uu gadaal u jeedo.
- Hubso in suunka xakameynta nafaas yahay oo u ballac ugu xiran yahay garbaha cunugga.
- Hubso in balastikada isku haysa biinanka aay la simantahay kilkilaha cunugga.

Laga soo Xigtay: Maamulka Ammaanka Gaadiidka Waddoyinka Qaranka, Waaxda Gaadiidka Maraykanka (National Highway Traffic Safety Administration, U.S. Department of Transportation)

**Sida loo sameeyo fiidiyaha ka eeg:** "Your Baby – Newborn to Age 2 in Rear-facing Seats" (*Canuggaad – Ilmaha dhashay illaa 2 jirka ku xir Kuraasta dambe ee gaariga*) Lagala xariirayo http://www.chop.edu/carseat

**LATCH (Dhaabashada iyo Silsiladaynta Hoose ee Caruurta): Gadaal u jeeda**

**LATCH** (Dhaabashada iyo Silsiladaynta Hoose ee Caruurta) waa hab isku dhejisan oo adiga fursad kuu siinaya inaad gaariga ku rakibtid adiga oo aan isticmaalaynin suumanka gaariga. Wuxuu ka kooban la job oo bira yar yar, oo la yiraahdo xakameyayaasha hooseya, oo ku yaalla gaadaasha kursiga gaariga halka ay isku imaanaya dhinaca kore iyo dhinaca sare ee kursiga. Kuraasida gaariga ee leh waxay leeyihiin qaybo lagu dhejiyo oo lagu adkeeyo biinanka. Kuraasida wata LATCH waxay leeyihiin meelo lagu adkeeyo biinanka hoose. Gawaarida la soo saaray wixii ka dambayey Sateembar 1, 2002 waa inay lahaadan LATCH, iyo kuraasida caruurta badankooda. Haddii aadan hubin in gaarigaaga ama kursiga gaariga uu nidaamkaas leeyahay, eeg diinwaanka gaarigaaga iyo diiwaanka kursiga gaariga. Haddii labadoodaba aysan lahay habka biinanka ah, waa inaad markaa isticmaashid suumanka gaariga si aad kursigaaga gaariga ugu adkaysid.

**Biinanka suunka lagu adkeeyo**
**Muhiim:** Biinanka suunka lagu adkeeyo ee kore laguma isticmaalo kuraasida badalmaya ee gadaal u jeeda. Iska eeg diiwaanka gaarigaaga si aad u xaqiijisid inaad si ammaan oo saxan aad u isticmalaysid.

Biinanka suunka lagu adkeeyo ayaa laba rabaa in laga helo gawaarida cusub, fananka yar iyo baaburta fudud tan iyo Sateembar 2000. Biinanka suunka lagu adkeeyo waxaa laga heli karaa qayb kasta oo gaariga kamid ah (murayadda dambe ee gaariga, gaariga gadaashisa, kursiga hostiisa, dhulka hoose iyo halka kore, iwm.). Eeg diiwaanka gaarigaaga haddii aad helistooda ku wareertid. Biinanka kore aa gariga kaga yaalla dhinaca kore ayaa lagu adkeynayaa xakameyeyaasha. Biinanka suunka lagu adkeeyo ee ku yaalla kursiga korkiisa ayaa xakameyaha ku adkeeynaya. Biinanka suunka lagu adkeeyo ee kore waxay hagaajinayaan ammaanka ayadoo adkaynta kursiga korkiisa ay ka hortagayaan (iyo cunuga madaxiisa) in uu durko horay marka uu shil dhaco ama si degdegsan gaariga loo joojiyo.

**Muhiim:** Isticmaal LATCH marka shirkadda gaariga samaysay ay sidaasi ku soo talisay. Haddii la isticmaalayo suunka caynka hoose, suunka fadhiga gaariga ha isticmaalin.

**Ku Rakibidda Saxda ah**
• LATCH ka kursiga gaariga waa in la mariyo meesha furan oo ay ku qorantahay calaamadda gadaal u jeedinta. Suunku waa in uu si ballac loo xiraa ee aan la wareejin.
• Kursiga gaariga si janjeerta ugu hagaaji fadhiga gaariga oo leh ku-xirayaasha LATCH.
• Si sahlan loogu rakibo, suunka LATCH ka sida ugu dherer badan u fidi.
• Kula xir kuxirayaasha hoose ee gaariga. (Faahfaahinta dheeraad ka eeg diiwaanka gaariga). Iska hubso in kursiga uu si fiican loogu xiray.
• Si adag hoos ugu riix ama inta gaariga meesha dhexe ku jilba jabsatid si aad hoos ugu riixdid kursiga gaariga inta aad ku adkanaysid suunka LATCH. (Kursiga waa inuusan ka durqin wax hal inji badan gees ka gees ama horay iyo gadaal halka ku addan meesha suunka uu marayo.) Haddii suunka uusan si adag ugu xirnyn, fadhi kale ku day ama inta furfurtid habka LATCH oo isticmaal habka suunka kursiga.

Laga Soo Xigtay: Maamulka Ammaanka Gaadiidka Waddoyinka Qaranka, Waaxda Gaadiidka Maraykanka, Machadka Dhakhaatiirta Caruurta ee Ameerika (National Highway Traffic Safety Administration, U.S. Department of Transportation; American Academy of Pediatrics)